Heerka Waa Shaqaynaysa PolicyStat ID 15141282

| | |
|---|---|
| Ansixinta Hore | 8/17/2001 |
| Dhaqan galaaya | 1/31/2024 |
| Dib u Eegista Xigta | 1/30/2025 |
| Fududeeye | Rowena Fish: DirMareegta Dakhli aruurinta Mgt |
| Aaga Caymiska | Mareegta Dakhli aruurinta |
| Ku haboonaanta | Bukaan Socodka FHCC & Montlake |
| References | Org Wide/Xarunta |

# Kaalmada dhaqaalaha ee FIN603 - 8173037

KOOBIGA

## BAAXADA:

Xeerkaan wuxuu khuseysaa dhammaan goobaha bukaan socodka iyo bukaan ee caafimaadka ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ("Fred Hutch") iyo dhammaan adeegyada degdega ah iyo kuwa kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah ee ay bixiso Fred Hutch. Liiska goobaha ku jira caymiskaan ayaa laga heli karaa lifaaqa I - Liiska Dhakhaatiirta iyo Adeegyada Caymisku daboolaayo.

Xeerkaan waxaa loo turjumayaa qaab waafaqsan Qaybta 501(r) ee Xeerka Dakhliga Gudaha oo soo baxay 1986, ee wax laga beddelay. Marka ay iska horyimaadaan qodobada sharciyadaas iyo xeerkaan, sida sharciyadda ayaa maamuli doonaa.

## UJEEDADADA:

Ujeedada xeerkaan waa in la xaqiijiyo in bukaannada Fred Hutch ee ku jira ama qarka u saaran heerka fakhriga ee federaalka ay helaan adeegyada caafimaadka ee haboon ee ku saleysan isbitaalka si bilaash ah kuwaasoo lagu saleynaayo awoodooda qarash bixinta. Kaalmada dhaqaalaha waxaa la siiyaa bukaanadaan ayadoo lagu saleynaayo baahida qoyska. Si loo ilaaliyo sharafta hawlaha Xarunta Kansarka ee Fred Hutch loona buuxsho balan qaadkaan, Xarunta kansarka ee Fred Hutchinson ayaa dhaqan gelisay shuruudaha soo socda ee bixinta kaalmada dhaqaale, taasoo waafaqsan shuruudaha ku qoran Cutubka 246-453 WAC, Cutubka 70.170 RCW, 26 USC §501(r) iyo SHB-1616. Kaalmada dhaqaalaha ayaa la siin doonaa dhammaan dadka u qalma ayadoo aan oo eegayn da'da, isirka, midabka, diinta, jinsiga, galmada, dookha galmada ama wadanka uu kasoo jeedo.

## QEEXITAANNADA:

- "**Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka (AGB)**" waxaa laga wadaa in aan bukaannada u qalma kaalmada dhaqaalaha laga qaadi doonin lacagta daryeelka oo ka badan cadadka caadiyan laga qaado dadka haysta caymiska ee daryeelkaas helaaya.

- "**Codsade**" waxaa laga wadaa bukaanka ama qofka masuulka ka ah lacag bixinta.
- "**Adeegyada haboon ee caafimaadka ee lagu bixiyo isbitaalka**" waxaa laga wadaa adeegyada isbitaalka ee sida macquulka ah loo qiimeeyay si loo helo, loo saxo, loo daweeyo, loo yareeyo, ama looga hortago xanuun kasii daraaya kaasoo khatar ku ah nolosha, sababaaya sakaraad ama xanuun, ama keenaaya xanuun ama naafo, ama khatar gelinaaya abuurista ama uga sii darista naafada, ama keenaaya hawlgabka jirka ama naafada, aysana jirin qaal u dhigma oo kale oo ka fudud ma aka qiimo jaban oo daawayn oo la heli karo ama ku haboon qof codsanaaya adeegga. Qeexitaankaan marka laga hadlaayo, "koorsada daawada" waxaa ku jiri kara eegis keliya ama, marka ay haboon tahay, aanba la bixin wax daawo ah.
- "**Qoyska**" waxaa laga wadaa koox labo qof ah ama ka badan oo wadaaga dhalasho, guur, ama koriimo oo isla nool; dhammaan dadka noocaas ah ee wadaagta ah ayaa qayb ka ah hal qoys.
- "**Kaalmada dhaqaalaha (daryeelka deeqda ah)**" waxaa laga wadaa adeegyada caafimaadka ee haboon ee lagu bixiyo isbitaalka lana siiyo dadka danyarta ah.
- "**Dakhliga**" waxaa laga wadaa wadarta guud ee lacagta cadaanka ah uu qofku helo kahor inta aan canshuurta laga jaran ee uu ku helo mushaaraadka iyo gunnooyinka, lacagaha deeqda ah, lacagaha Social Security, gunnooyinka shaqo joojinta, gunnooyinka shaqo la'aanta ama naafada, taageerada carruurta, alimony, iyo faa'iidooyinka ganacsiyada iyo hawlaha maal gashiga ee qofka la siiyo.
- "**Dadka Danyarta ah**" waa bukaannada ama damiinteyaasha u qalma daryeelka deeqda ahee lagu saleeyay heerka fakhriga ee federaalka, kaasoo lagu dabaqay tirada qoyska, kuwaasoo aana haysan cid sadexaad oo qarashka ka dhiibta.
- "**Caymiska Qolada Sadexaad**" **-** Masuuliyad saaran qayb kamid ah shirkada caymiska, qandaraaslaha adeegga daryeelka caafimaadka, ururka ilaalinta caafimaadka, qorshaha caafimaadka kooxda, barnaamijka dawlada, gunnooyinka caafimaadka ee qabiilka, ama wasaarada wadaaga daryeelka caafimaadka sida ku cad 26 U.S.C. qodobka. 5000A ee bixinaysa qarashka daryeelka bukaannada iyo adeegyada caymisku daboolaayo, waxaana ku jiri kara heshiisyada, xukunnada, ama deeqaha sida rasmiga ah loo helay ee la xiriira falalka dayacaada ah ee dhinacyada kale ka yimid kuwaasoo keenay xaalad caafimaad oo bukaanka u keentay inuu adeegga daryeelka caafimaadka ka helo isbitaalka. Rahmanaanta heshiisyada noocaas ah, xukunnada, ama abaal marinnada waa inay ku jirtaa masuuliyadaha isbitaalka ee tixgelinta bukaanka u qalma daryeelka deeqda ah.

KOOBIGA

# XEERKA:

**Shardiga Uqalmida Kaalmada dhaqaalaha:**

Bukaannada soo socda ayaa u qalmi kara kaalmada dhaqaale sida ku cad xeerkaan:

1. Bukaannada codsanaaya adeegyada caafimaadka ee isbitaalka lagu baxiyo ee haboon; iyo
2. Bukaannada **aan** codsanayn daawaynta ikhtiyaariga ah, baarista ah, ama tijaabada ah.

Kaalmada dhaqaalaha ayaa caadiyan ah dookha labaad marka dhammaan ilaha kale ee bixinta qarashka bukaanka la waayo. Tan waxaa ku jira:

1. Qorsheyaasha caafimaadka ee kooxda ama shaqsiga.
2. Barnaamijka Magdhawga shaqaalaha.
3. Medicare, Medicaid ama barnaamijyada kale ee caawimaada caafimaadka.
4. Barnaamijyada kale ee gobalka, federaalka ama milatariga.

5. Xalaadaha qaanta ee dhinaca sadexaad. (tusaale, shilalka gaariyaasha ama dhaawacyada shaqsiga ah).
6. Gunnooyinka caafimaadka qabiilka.
7. Wasaarada wadaaga daryeelka caafimaadka sida lagu qeexay 26 U.S.C. Qodobka. 5000A.
8. Xaaladaha kale ee qof kale, shirkad, wakaalad dawladeed ama safaarad ay masuuliyad sharci ka saarnaan karto bixinta qarashaadka adeegyada caafimaadka.

Shaqaalaha Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaa sidoo kale kala shaqeeya bukaannada/qoysaska aan haysan Dhinac Sadexaad oo ka bixiya lacagta si loo qiimeeyo in bukaannadaas/qoysaskaas ay u qalmi karaan barnaamijyada caawimaada caafimaadka ee Washington (tusaale, Apple Health) iyo/ama caymiska caafimaadka ee ay ka helaan Isdhaafsiga Gunnada Caymiska Caafimaadka (RCW 43.71) ama barnaamij kasta oo kale Medicaid ka gobalka ah.

Ayadoo qayb ka ha hawsha codsiga kaalmada dhaqaalaha ee go'aaminta u qalmida caafimaadka dhaqaaaha, Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaa baari doonta in bukaanka ama damiinkiisu u qalmo shuruudaha caymiska caafimaadka ee lagu bixiyo barnaamijyada caawimaada caafimaadka ee ku qoran cutubka 74.09 RCW ama Isdhaafsiga Gunnada Caafimaadka ee Washington.

Haddii macluumaadka ku qoran codsiga ay sheegto in bukaanka ama damiinkiisu u qalmo caymis, waxaan ka caawin doonaa bukaanka ama damiinkisa codsashada anagoo, ayadoo la socdaan waxyaabo kale, siinayna bukaanka/qoyska xog ku saabsan hawsha codsiga, ka caawinayna bukaanka hawsha codsiga, siinayna foomamka muhiimka ah ee ay qasabka tahay in la buuxiyo, iyo/ama ku xirayna bukaanka/qoyska wakaaladaha kale ama khayraadka kuwaasoo ka caawin kara bukaanka/qoyska buuxinta codsiyadaas. Inta aan ka caawinayno hawsha codsiga, waxaan tixgelin doonaa ciladaha dhanka jirka, dhimirka, garaadka, dareemaha ama caqabadaha luuqada ee carqalada ku noqon kara midkood bukaanka ama damiinkiisa si uu u raaco habraacyada codsiga kumana soo rogi doono habraacyo bukaanka ama damiinkiisa kuwaasoo ku keenaaya culays qayru caadi ah.

Haddii bukaanka ama damiinkiisu ku fashilmo inuu sameeyo dedaallada ku haboon si uu ugala shaqeeyo Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson codsashada caymiska ku cad Cutubka 74.09 RCW ama Isdhaafsiga gunnada Caafimaadka ee Washington, masuul kama nihin inaan kaalmada dhaqaale siino bukaanka noocaas ah.

Haddii bukaanka ama wakiilkiisu uu si iska cad aa muuqata ugu qalmin ama loo aqoonsaday mid aan u qalmin caymiska lagu bixiyo barnaamijyada caawimaada caafimaadka ee ku qoran cutubka 74.09 RCW ama Isdhaafsiga Gunnada Caafimaadka ee Washington 12 bilood ee lasoo dhaafay, Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson kuma qasbi doonto bukaanka ama damiinkiisa inuu codsado caymiska noocaas ah.

Haddii u qalmida bukaanka ee kaalmada dhaqaalaha ay iska muuqato, Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaa, marka ay sidaas u aragto, dooran karta inay ka cafido qaar ama dhammaan dukumiintiyada ama shuruudaha xaqiijinta. Tusaaleyaasha xaaladaha u qalmida bukaanka ee kaalmada dhaqaale ay iska muuqato waxaa ku jiri kara waxyaabaha soo socda:

1. Bukaanka ama damiinka shaciyay inuu dalaafay kuna daray daynta ay ku leedahay Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson lacagta dalaafka raacday;
2. Bukaanka ama damiinku dhinto asagoo aan ka tagin hanti muuqata;
3. Bukaanka ama damiinka loo aqoonsado qof bilaa hooy ah; ama
4. Xisaabta ay soo celiso wakaalada daynta qaada ayadoo ku astaysay mid aan lasoo heli karin midkood sababaha kore.

KOOBIGA

Fikirka shaqaalaha Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaa lagu jaangoyn doonaa xaaladaha marka ay jiraan arimo sida arimaha bulshada ama caafimaadka. Arimaha noocaas ah ayaa la qori doonaa si loo taageero tixgelinta caawimaada Dhaqaalaha.

**Shuruudaha Dhaqalaaha:**

Si waafaqsan WAC 246-453-040, tirada qoyska codsadaha iyo dakhliga ayaa dib u eegis lagu samayn doonaa waxayna go'aamin doonaan Heerka Fakhriga Federaalka (FPL), boqoleeydaan ayaa go'aaminaysa heerka caawimaada Dhaqaalaha ee la bixinayo ayadoo lagu saleynaayo taariikhda adeegga la baxshay. Shuruudaha caawimaada dhaqaale ee la bixinaayo ayaa laga heli karaa Lifaaqa II - Shuruudaha Bixinta Kaalmada dhaqaalaha ee Qaybaysan. Codsadeyaasha (bukaanka ama damiinadooda) ayaa u qalmi doona caawimaada Dhaqaalaha ee qaybta bukaanku masuulka ka yahay ee qarashaadka isbitaalka taasoo u dhiganta baaqiga aan la dhiibin ee soo haray kadib marka dhammaan ilaha kale ee qarash bixinta iyo damaanada ay dhammaadeen.

Go'aaminta u qalmida caawimaada Dhaqaalaha ayaa qaban doonta qaybta daryeelka ee la aqoonsaday marka go'aaminta la samaynaayo. Abaal marinta kaalmada dhaqaalaha ayaa shaqeynaysa muddo lix bilood ah. Caawimaada dheeriga ah ee dhaqaalaha ayaa laga doonayaa inuu mar kale codsado codsaduhu.

**Habraaca Codsiga:**

Si loo xaqiijiyo maareynta saxda ah ee koontada bukaanka, codsiyada kaalmada dhaqaalaha waa in laga codsadaa Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ama Shaqaalaha Koontada Bukaanka. Foomamka iyo tilmaamaha buuxinta go'aaminta kala danbaysta ah ayaa la siin doonaa codsadaha marka la codsado kaalmada dhaqaalaha, ama marka baaritaanka dhaqaaluhu muujiyo in baahi jirto. Codsadeyaasha ayaa codsan kara caawimaada Dhaqaalaha marka ay doonaan ilaa maxkamad ay xukun ka dhan ah soo saarto codsadaha oo la xiriirta lacagta lagu leeyahay.

codsadeyaasha soo gudbiya codsiga kaalmada dhaqaalaha kuwaasoo horeyna loo go'aanshay inay u qalmaan kaalmada dhaqaale ayaa loo ogolaan doonaa 14 maalmood inay ku dhameeyana hawsha codsiga. Codsigaan, oo ay la socdaan shaacinta buuxda ee xaaladaha dhaqaale ee codsadaha oo wata dukumiintiga cadeynta, ayaa loo adeegsan doonaa go'aaminta kama danbaysta ah ee u qalmida.

Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaa joojin doonta hawlaha dayn uruurinta inta codsiga kaalmada dhaqaalaha uu socdo.

Marka uu codsade bixiyo qayb ama dhammaan lacagta Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ee la xiriirta adeegga caafimaadka ee isbitaalku siiyay gadaalna laga ogaado inuu buuxiyay shuruudaha kaalmada dhaqaalaha markii ay Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson siisay adeegyada, waxaan u celin doonaa cadadkaas lacageed codsadaha 30 maalmood gudahood marka la gaaro go'aanka ansixinaaya codsiga caawimaada Dhaqaalaha.

**Go'aaminta U Qalmida:**

Dukumiintiga dakhliga ee xaqiijinaaya xog ku saabsan Kaalmada dhaqaalaha /Foomka Codsiga Daryeelka Deeqda ah ayaa la codsan karaa. Marka la codsado, dukumiintiga xaqiijinta waxaa ku jiri kara risiidyada mushaarka (labadii biloow ee ugu danbeeyay). Marka codsade uu codsado kaalmada dhaqaale oo ku aadan lacagaha daynta ah ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson, waxaan codsan karnaa dukumiinti waafaqsan qaybtaan si aan u xaqiijino dakhliga codsadaha markii ay Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson siisay adeegyada. Midkood dukumiintiyada soo socda waa in loo aqoonsadaa cadeynta rasmiga ah ee loo cuskan doono go'aanka kama danbaysta ah ee u qalmida kaalmada dhaqaalaha.

KOOBIGA

1. Bayaanka haysashada "W-2"
2. Risiidka mushaarka
3. Canshuur celin kasta oo dakhli oo qusaysa sanad canshuureedkii ugu danbeeyay
4. Foomamka xaqiijinaaya ama diidaaya u qalmida Medicaid iyo/ama caawimaada caafimaadka ee gobalku maal geliyo
5. Foomamka xaqiijinaaya ama diidaaya magdhawga shaqo la'aanta
6. Cadeymaha qoran ee ka yimaada loo shaqeeyaasha ama wakaaladaha faya dhawrka

Haddii aan codsaduhu awoodin inuu keeno midna dukumiintiyada kor ku qoran, cadeynta qoran ee saxiixan kana timid codsadaha oo xaqiijinaysa dakhligiisa ayaa la cuskan karaa.

Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaan tixgelinayn jirintaanka, helitaanka, ama qiimaha hantida bukaanka ama dhinaca masuulka ka ah si ay u go'aamiso u qalmida Kaalmada dhaqaalaha.

Nuqullada dukumiintiyada taageeraaya codsiga ayaa la raacin doonaa foomka codsiga. Go'aaminta u qalmida waxaa gaari doonta Waaxda Xisaabaadka Bukaanka iyo/ama Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka.

Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaa ku bixinaysa go'aanka kama danbaysta ah qoraal ahaan, ayna ku jiraan cadadka codsaduhu dhaqaale ahaan masuul ka noqon doono, 14 maalmood gudahood marka uu soo gaaro codsiga iyo dukumiintiyada cadeynta ah. Diidmada, ayna ku jiraan aasaaska diidmada, ayaa noqon doona kuwo qoran waxaana ku jiri doona tilmaamaha racfaan qaadashada ama codsashada dib u eegista.

Codsadaha ayaa racfaan ka qaadan kara go'aaminta u qalminda caawimaada Dhaqaalaha asagoo keenaaya cadeynta dheeriga ah ee dakhliga ama tirada qoyska oo uu u gaynaayo Madaxa Xafiiska Dhaqaalaha 30 maalmood gudahood marka ogeysiisku soo gaaro. Dhammaan racfaannada waxaa dib u eegi doona gudiga racfaannada ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson si ay uga soo saaraan go'aan kama danbays ah. Haddii go'aankaan uu xaqiijiyo diidmadii hore ee kaalmada dhaqaalaha ogeysiiska qoran ayaa loo diri doonaa cida masuuliyada leh iyo Waaxda Caafimaadka sida ku cad sharciga gobalka.

Haddii codsiga la diido, lama bilaabi doono hawlaha dayn uruurinta muddo 14 maalmood ah kadib marka diidmada lasoo saaro. Haddii racfaan lasoo gudbiyo, hawlaha dayn uruurinta ayaa la joojin doonaa ilaa racfaanka go'aan kama danbays ah laga gaaro.

Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson kama qaado codsade kasta oo helaaya adeegyada uu daboolaayo Caymiska Kaalmada dhaqaalaha lacag ka badan qiimaheena guud ee ama wax ka badan cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka (AGB) ee shaqsiyaadka haysta caymis daboolaaya isla adeegyada sabab la xiriirta inay adeegsadeen qaabka dib u eegista ee lagu qeexay qodobka 501(r)(5)(b)(4) ee Xeerka Dakhliga Gudaha. Codsadeyaasha ayaa heli kara nuqulka Xaashida Xogta Xisaabta AGB ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson (Lifaaqa III) ayagoo la xiriiraaya waaxda Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ama booqanaaya webseedka.

Si aad u hesho xog ku saabsan adeegyada uu daboolaayo caymiska Kaalmada dhaqaalaha ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson, fadlan eeg Liiska Bixiyaasha iyo Adeegyada Caymisku Daboolaayo (Lifaaqa I) ama la xiriir waaxda Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka si aad u hesho nuqul.

Xeerarkeena qarash dalbashada iyo dayn uruurinta ee cadadyada aan lagu daboolayn deeqaha caawimaada Dhaqaalaha ayaa lagu go'aanshaa sida ku cad Xeerka Dayn Uruurinta ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson.

KOOBIGA

Helitaanka daryeelka degdega ah ayaan dib loo dhigi doonin ama la diidi doonin ayadoo la cuskanaayo awooda bukaanka ee bixinta adeegyada ama go'aaminta xaalada masuuliyada bukaanka.

**Ogeysiiska iyo Helitaanka Luuqada:**

Xeerka Kaalmada dhaqaalaha ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson, Khulaasada Luuqada Fudud ku qoran ee Xeerka Kaalmada dhaqaalaha, Liiska Bixiyaasha iyo Adeegyada Caymiska ku Jira (Lifaaqa I), Shuruudaha Deeqaha Kaalmada dhaqaalaha ee Qaybaha leh (Lifaaqa II), Xaashideena Xogta Xisaabta AGB (Lifaaqa III), codsiga caawimaada Dhaqaalaha, iyo Xeerka Dayn uruurinta ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaa lagu heli karaa af Ingiriis, Isbaanish, Fiyeednaamiis, Jayniis, Kuuriyaan, iyo af-Ruush. Waxaad heli karta anuqulka dukumiintiyadaan adoo booqanaaya waaxdeena Talo Bixinta Dhaqaalaha oo ku taala rugta Caafimaadka ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ee Lake Union oo ku taala 825 Eastlake Ave. East, Seattle, Washington, 98109. Waxaad sidoo kale codsan kartaa in nuqulka laguugu diro boostada si bilaash ah adoo wacaaya waaxda Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka oo aad ka helayso (206) 606-6226 ama taleefanka lacag la'aanta ah 1 (800) 304-1763, ama codsiyada iimeelka ugu dir fincounsel@fredhutch.org. Codsiyada qoraalka ah ayaa loogu diri karaa Talo Bixinta Dhaqaalaha ciwaanka 825 Eastlake Ave East, Mailstop: G3-650, Seattle, Washington 98109. Waxaad sidoo kale nuqulka dukumiintiyadaan kala soo dagi kartaa webseedkeena oo ah https://www.seattlecca.org/patients/financial-assistance. Waxaan siin doonaa Khulaasada Luuqada Fudud ee xeerkaan qof kasta oo u yimaada adeegyada bukaan jiifka ama bukaan socodka si iskiis ah. Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaa ogeysiiska qoraalka ah raaci doonta bayaanadeena codsashada qarashka ayadoo ku sheegaysa helitaanka kaalmada dhaqaalaha ee ku cad xeerkaan. Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaa ku soo dhajin doonta boorarka goobaha dadwaynaha ee gudaha isbitaalka ayadoo u sheegaysa dadwaynaha Xeerka Kaalmada dhaqaalaha. Marka ay haboon tahay, Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson ayaa kala shaqeyn doonta kooxaha iyo ururada bulshada siinta nuqulladeeda khulaasada kooban ee Xeerka Kaalmada dhaqaalaha dadka deegaanka.

KOOBIGA

# SHURUUDAHA:

N/A

# TIXRAACA:

- 26 USC §501(r)
- Foomka Codsiga Kaalmada dhaqaalaha /Daryeelka Deeqda ah
- Xeerka Dakhliga Gudaha qodobka 501(r)(5)(b)(4)
- Xeerka Daynta Uruurinta ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson
- Medicare (Title XVIII);
- Medicaid (Title XIX) (Washington Apple Health);
- RCW Cutubka 70.170
- WAC Cutubka 246-453-040
- Liiska Bixiyaasha Caymiska Ku jira_FAP Lifaaqa I
- Shuruudaha Deeqaha FA ee Qaybaha leh_FAP Lifaaqa II
- Xaashida Xogta Xisaabta AGB_FAP Lifaaqa III

## Lifaaqyada

1610146570-image1.jpeg

AGB Calculation Info Sheet_FAP Appendix III.docx

Covered Providers List_FAP Appendix I.docx

Criteria for Tiered FA Awards_FAP Appendix II.docx

## Saxiixyada Aqbalaada

| Qeexitaanka Talaabada | Ansixiyaha | Taariikhda |
| --- | --- | --- |
| | Natalie Simpson: Maamulaha Caymiska iyo Xeerka | 1/31/2024 |
| | Jen Griffin: Khabiirka Ansixinta iyo Arimaha Sharciga | 1/31/2024 |
| | Rowena Fish: Maamulaha Mareegta Dakhli aruurinta ee Dir | 1/31/2024 |
| | Rowena Fish: Maamulaha Mareegta Dakhli aruurinta ee Dir | 1/31/2024 |

## Qusaynta

Xeerarka FHCC Montlake, Xeerarka Bukaan Socodka FHCC